# Qancinta Baahida la Aqoonsanyahay ee Ilmahaaga iyo Qoyska ee Ka-hortagga Hore

(Meeting the Identified Needs of Your Child and Family in Early Intervention - Somali translation)

Adeegyada qoysaska dhallaanka iyo socod baradka naafada ah (howlaha ka-hortagga hore) waxaa haga Qeybta C ee Sharciga Shakhsiyaadka Waxbarashada Dadka Naafada leh (Individuals with Disabilities Education Act (IDEA). Adeegyadan waxaa loo naqshadeeyey inay sare u qaadaan horumarka dhallaanka iyo socod baradka naafada ah, iyo awoodda qoysaskooda si ay u qanciyaan baahida ilmahooda.

Marka shaqaalaha waxbarashada gaarka ah ee Minnesota ay u fidiyaan adeegyo carruurta yar iyo qoysaskooda, qaar ka mid ah degmooyinka dugaasida ayaa laga yaabaa inay iskaashi la yeeshaan Wasaaradda Waxbarashada ee Minnesota, si loo hirgeliyo hanaan ka-hortag ah oo loo yaqaan Caqabadaha Ku-saleysan cadeyn xaqiiqi ah ee ka-hortagga ee lukhadda English-ka loo yaqaan (Evidence-Base Quality Intervention Practices; marka la soo gaabiyana EQIP). EQIP waa qaabab ku saleysan caddeyn, oo diiradda saaraya dhisida awooda qoyska, iyadoo la adeegsanayo habab tababareed iyo bixinta howlaha ka-hortagga oo lagu fulinayo jawiga dabiiciga u ah ilmaha.

Howlgelintan ku saleysan caddeynta waxa la adeegsanaya ka-horttag, xeelado, iyo waxqabadyo lagu caddeeyay inay wax ku ool u yihiin cilmi baarista. Haddii la bixinayo adeegyada ka-hortaggaa hore iyadoo la adeegsanayo EQIP, dadka xubnaha ka ah kooxda Adeegyada Qoyska ee qoyska oo Engriiska loo yaqaan (Individualized Family Service Plan IFSP) waxay isticmaalayaan waxyaabaha soo socda ee ku saleysan caddeynta, oo ku saleysan cilmi baarista ay Dr. Dathan Rush iyo M'Lisa Shelden,[1] oo ay weheliyaan khubaro kale oo qaran.

## Tababarka xarakaadka la macaamiltanka

Hal caqiido oo muhiim u ah EQIP waa tabobar dadka ilmaha daryeela. Tababarku waa xeelad wax-baris dadka la shaqeeya ilmaha, oo ku saleysan caddeyn. Xubnaha kooxda IFSP waxay waqti la qaadanayan qoyskaaga ama dadka daryeelka bixiyeyaasha kale, iyagoo wax ka baran doona aragtidaada, welwelkaaga, waxyaabaha mudnaanta la siinayo, iyo riyada ilmahaaga. Tababarahaaga daryeelaha ayaa:

- Waxey ixtiraamayaan waxaad horay u taqaanay iyago aqoonsanaya kuna hana qaadaya waxa aad hadda qabanayso si aad u taageerto waxbarashada iyo horumarka ilmahaaga
- Waxey si wada jir ah kaala shaqeynayaan abuurista iyo hirgelinta qorsho qancinaya baahidada iyo muhiimadda
- La tashanaya xubnaha kale kooxdaada IFSP wixii ku saabsan adeegyada canuggaaga oo ka soo ururinaya fikradaha ku saabsan sida loo dhiirrigeliyo horumarka ilmahaaga

Ka dib marki la barto waxyaabaha muhiimadda u leh ilmahaaga, xubnaha kooxdaada waxay kuu soo bandhigeysa xeelado ka-hortag ah oo ku saleysan cadeymaha si aad isugu daydo. Iyaga ayaa kuu dejin doona istaraatiijiyadan adiga oo la shaqeynaya ilmahaaga. Markaad aragto oo aad u fiirsato, waxay ku siinayan fursad aad kula tababarato xeeladaha ilmahaaga iyagoo ku daawanaya oo ay ku siinayaan ra'ayi celin. Haddii aad ku qanacsan tahay istiraatiijiyaddan, waad u isticmaali kartaa inta u dhexeysa booqashooyinka oo aad warbixin ka bixin kartaa booqashadaada soo socota. Haddii muhiimadda ama baahida ilmahaaga ay isbeddelaan, kooxdaada IFSP ayaa kulmi kara si ay uga fiirsadaan oo ay ula tashadaan xubnaha kale ee kula ee ka qancin kara adiga iyo baahida ilmahaaga. Waxay kuxirantahay qaab-dhismeedka waaxda waxbarashada khaaska ah ee degmadaada dugsiga, waxaa laga yaabaa inaad iskaashi la sameyso.

[1](Rush & Shelden, *The Early Childhood Coaching Handbook*. 2013.)

©2021, PACER Center, Inc. 
8161 Normandale Blvd., Minneapolis, MN 55437 | (952) 838-9000 | (800) 537-2237
PACER@PACER.org | PACER.org

Tababaraha koowaad si uu ula kulmo baahida ilmahaaga iyo qoyskaaga. Tababaraha koowaad wuxuu u adeegi karaa inuu noqdo xiriiriyahaaga ugu muhiimsan ee isku dubbaridka adeegyada iyo xiriirka lala yeesho bixiyeyaasha kale ee kooxda IFSP.

## Dhaqamada ku saleysan qoyska

Mid ka mid ah faa'iidooyinka lagu aqoonsado tababare aasaasi ah, haddii degmadaadu isticmaasho tusaalahan, ayaa ah inaad yeelaneyso adeeg bixiyeyaal yar oo aad si joogto ah ula fal gasho. Joogtayntani waxay kaa caawin kartaa adiga iyo bixiyeyaashaada inaad horumariso xiriir ku dhisan kalsooni, is ixtiraam, iyo wada hadal furan. Cilmi baaris ayaa muujisay in xiriirka noocan ah uu ka dhasho natiijooyinka canugga iyo qoyska. Iyadoo aan loo eegin haddii degmadaadu leedahay macallimiin aasaasi ah, tababar bixiyaha daryeelaha wuxuu adeegsadaa dhaqamada soo socda ee ku saleysan qoyska si loo horumariyo loona taageero xiriirkaaga:

- Si ixtiraam leh loo qadariyo dhaqankaaga waxa aad aaminsantahay
- Laga jawaabo waxyaabaha qoyskaagu walaca ka qabo iyo waxyaabaha muhiimadda ku ah
- Lagu siinayo macluumaad dhammaystiran oo aan eex lahayn oo ku xaqiijinaya kuna anfacaya kuna habboon qaabkaaga waxbarasho
- Xushmeynta xulashooyinka qoyskaaga ee ku saabsan halka iyo sida adeegyada ka-hortagga hore loo bixin doono
- Lagu siinayo fursado la-mucaamilatan ah oo aad ku baran karto, kuna tababaran karto xirfado cusub si aad u caawiso ilmahaaga

## Jawiga dabiicaga ah ee barashada

Markaad barato istiraatiijiyado ka-hortag ah oo cusub, kooxdaada ayaa kaa caawin doonta inaad hesho dariiqooyin aad ku dhex-dartid nolol-maalmeedka ilmahaaga iyo qoyska, abuurista jawi waxbarasho dabiici ah. Barashada dabiiciga ahi waxay dhacdaa marka ilmahaagu xiiseeyo, ka qayb qaato, kana qayb galo hawl maalmeedkooda iyo waxqabadyadooda. Hawlaha maalinlaha ah waxaa ka mid ah waxqabadyada guriga, barnaamijka daryeelka carruurta, iyo bulshada dhexdeeda. Deegaanadan waxbarasho ee dabiiciga ah waxay bixiyaan waqtiyo lagu daro istaraatiijiyooyinka faragelinta hore ee nolol maalmeedka ilmahaaga. Waxqabadyadu waa inay ahaadaan kuwo xiiso leh oo ku saleysan danaha iyo dhaqanka ilmahaaga iyo qoyskaaga. Cilmi-baaristu waxay muujisay in carruurtu si dhakhso leh wax u bartaan una dhisaan xirfado cusub markii loo soo bandhigo laguna dhaqmo inta lagu jiro hawl maalmeedkooda caadiga ah.

## Xeeladaha EQIP iyo qoyskaaga

EQIP waxay aqoonsantahay kuna dhisaysaa awoodaada macalinka koowaad ee ilmahaaga. Dhaqamadaan waxaa loogu talagalay inay sare u qaadaan kartidaada iyo kalsoonidaada - iyo tan daryeel bixiyaasha kale - iyagoo ka caawinaya ilmahaaga inuu horumariyo oo waxbarto. EQIP waxay qireysaa muhiimadda la-mucaamiltanka cunugaaga adiga iyo daryeelayaashooda kale. Waxaad ka ciyaareysaa door muhiim ah howshan adiga oo la wadaagaya rajadaada iyo riyadaada canugaaga, barashada sida loogu daro istaraatiijiyado cusub howlaha maalinlaha ah ee ilmahaaga iyo waxqabadyadiisa, iyo inaad ilaaliso xiriir iskaashi oo xoog leh kooxdaada. Dhaqamadaan waxaa loogu talagalay in lagu xoojiyo laguna taageero qoyskaaga iyo daryeel bixiyeyaasha kale iyada oo laga caawinayo ilmahaaga inuu horumariyo xirfadaha lagama maarmaanka u ah inuu si buuxda oo guul leh uga qeybqaato guriga iyo bulshada dhexdeeda.

Wixii macluumaad dheeraad ah ee ku saabsan adeegyada ka-hortagga hore, waxaad ka eegtaa websaydhka PACER Center Early Childhood website. Dalbo daabacaadda Families Are Important! An Early Childhood Guidebook for Families of Young Children. Waxaad sidoo kale ku dalban kartaa nuqul taleefanka (952) 838-9000. U doodayaasha PACER ayaa diyaar u ah inay ku caawiyaan! Ka wac PACER lambarka (952) 838-9000 oo weydii inaad la hadasho u-doodaha carruurnimada hore, ama emayl u soo dir PACER@PACER.org.